



Dib U Eegista Naafanimadaada

Miiska ku jira

Imisa jeer ayaa xaaladeyda caafimaadka dib loo eegayaa?	1
Sidee ayaa la igu soo wargelinayaa dib u eegista?	2
Maxaa dhacaya marka dib loo eegayo?	2
Yaa gaaraya go'aanka naafanimada?	2
Sidee ayey go'aanka uga gaaraan?	2
Maxaa dhacaya haddii aan go'aanka ku diidanahay?	2
Waa maxay xaaladaha macaashka lagu joojinayo?	3
Maxaa dhacaya haddii aan?	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	3

Haddii macaashka aad ka qaadato Lambarka Bulshada ama Macaashka kabitaanka ah ee Naafada ee Lambarka Bulshada (SSI), waxaan dib u eegeynaa xaaladdaada caafimaadka markii muddo la joogaba si aan u xaqiijino in aad weli naafo tahay.

Guud ahaan, haddii aanu caafimaadkaagu ka soo reyn, ma haddii aad weli naafo tahay, waxaa kuu sii soconaya macaashka.

Nidaamka aad dib ugu eegeyno xaaladaada waxa ay ku siineysaa fursad aad nagu tusto in aad weli xaq u leedahay macaashka naafanimada oo macaashkaaga si qalad ah loo joojiyey. Waxaanu qiimeyneynaa dhamaan caddeymaha aad noo soo gudbiso ee ku saabsan xaaladaada. Haddii aad jirto wax ka badan xaalada oo u baahan in la tixgeliyo,

waxaan tixgelineynaa sida ay guud ahaan dhamaantood saameyn ugu yeesheen in aad shaqada dib ugu noqoto.

Halka hoose waxaa ku xusan su'aalaha inta badan la is weydiyo ee ku saabsan dib u eegista naafanimada.

Imisa jeer ayaa xaaladeyda caafimaadka dib loo eegayaa?

Inta jeer ee dib loo eegayo waxa ay ku xiran tahay dabeecadda iyo sida ay xasaasi u tahay xaaladaada caafimaadka iyo haddii la filayo in ay ka soo reyso.

- Haddii la filayo in ay ka soo reyso, dib u eegista u horeysa waxa ay noqoneysaa lix ilaa 18 bilood ka dib maalinta aad naafada noqotay.
- Haddii ay suurogal tahay in aad ka soo reyso, laakiin aadan garan karin, waxaanu xaaladdaada dib u eegeynaa mar sadexdii sano ee kasta; dhanka kale
- Haddii aanay suurogal aheyn in xaaladaadu ka soo reyso, waxaanu dib u eegeynaa hal mar todobadii sanaba.

Sidee ayaa la igu soo wargelinayaa dib u eegista?

Marka aan go'aan ku gaarno in dib u eegis buuxda loo baahan yahay, waxaan kuu soo direynaa waraaq laguugu sheegayo in aad timaado Xafiiska Lambarka Bulshada

Maxaa dhacaya marka dib loo eegayo?

Marka dib loo eegayo, sida xaaladaada caafimaadku ay kuu saameeyso iyo haddii aad ka soo reyneyso. waxa aan ku weydiisaneynaa in aad dhakhtarkaaga magaciisa, cinwaankiisa, iyo telefoon lambarkiisa iyo diiwaanka caafimaadka ee isbitaalada iyo meelaha kale ee laga daweyey tan iyo markii uigu dambaysay ee aan kula soo xiriirnay. Haddii aad shaqeysay tan iyo markii aad codsatay macaashka naafada ama markii u dambaysay oo dib loo eegay xaaladaada, waxaanu dooneynaa macluumaadka taariikhda aad shaqeysay, dakhliga kaa soo galay iyo nooca shaqada aad qabatay.

Yaa gaaraya go'aanka naafanimada?

Waxaanu xaaladaada u gudbineynaa Adeegga Caddeynta Naafanimada ee gobolka aad ku nooshahay. Hay'adda go'aanka ka gaarta go'aanka naafanimada ee Lambarka Bulshada. Qof khabiir ku ah qiimeynta naafada ayaa warbixinta caafimaadka ka codsanaya dhakhtarkaaga iyo meelaha kale ee daawada ay kaaga socotay. Qofkaa khabiirka ah iyo la taliyaha xaga caafimaadka, oo wada

shaqeynaya koox ahaan, ayaa si taxadar leh u eegaya macluumaadka ay heleen oo dhango'aankana gaaraya.

Sidee ayey go'aanka uga gaaraan?

Xaaladaha intooda badan, go'aanku wuxuu ku sleysnaanayaa macluumaadka dhakhtarka, isbitaalka iyo ilaha kale ee caafimaadka. Laakiin, haddii aanay dhameytirneyn ama aanay aheyn tii ugu dambaysay, waxaa suurogal in lagu weydiisto in aad aadan lacagta bixineyn aad aragto. Si qoraal ah ayaa laguugu soo sheegayaa taariikhda, waqtiga iyo goobta.

Maxaa dhacaya haddii aan go'aanka ku diidanahay?

Waxa aad ka qaadan kartaa racfaan haddii aad nagu diidan tahay go'aankeena. Taas micnaheedu waxaa weeye waxa aad nma weydiin kartaa in aad dib u eegno codsigaaga si aan u aragno in go'aankeenu sax yahay. Waxaa jira afar heer oo racfaanka ah, iyadoo, in racfaanka aad ku soo gudbiso muddo 60 cisho gudahood ah inta u dhaxeysa labada heer. Afarta heer waxa ay kala yihiin:

- **Dib U eegista** — Waxaa codsigaaga si madax banaan u eegay dad aan horey uga qeyb q aadan go'aankii hore. Waad hor iman kartaa sarkaalka dib u eegista codsiga naafada ee go'aanka ka gaaraya codsigaaga.
- **Dhagesiga** — Haddii aad ku diidan tahay go'aanka dib u eegista, waxa aad codsan kartaa dhageysi uu dhageysto qaali xagga maamulka ah.
- **Gudiga Racfaanka** — Haddii aad ku diidan tahay go'aanka qaalgiga, waxa aad weydiisan kartaa in ay codsigaaga eegaan Gudiga Racfaanka.
- **Maxkamadda Dawladda Dhexe** — Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka Gudiga Racfaanka ama uu gudigu go'aan ku gaaro in aanu dib u eegin, waxa aad dacwad ka diiwaan gelin kartaa maxkamadda dawladda dhexe.

Waa maxay xaaladaha macaashka lagu joojinayo?

Guud ahaan, lacagta caddaanka ah ee lagu siiyo way istaageysaa oo kaliya haddii caddeymuhu muujinayaan in xaladaada caafimaadku ka soo reysay oo aad si caadi ah u sahayeyn karto. Inta aanay xaaladaadu ka soo reyn oo aadan shaqyn karin, lacagta caddaanka ah way kuu soconaysaa.

Maxaa dhacaya haddii aan?

Lambarka Bulshadu waxa uu leeyahay sharciyo u gaar ah oo kaa caawin kara haddii aad dooneyso in aad shaqeyso.

Haddii aad qaadato macaashka naafada oo soo sheegto dhaqdhaqaaqa la xiriiira xagga shaqada, waxa laga yaabaa in aan la xididin dakhliga ku soo geli kara mudada aad ku jirto tijaabada ee sagaalka bilood ah (muhim ma aha in ay isku xigaan) wwelina aad qaadan karta macaash buuxa. Shariyada kale ayaa kuu ogolaanaya macaashka lacagta caddaanka ah iyo in Medicare ay sii waddo inta aad isku dayeyso in si caadi ah u shaqeyso.

Haddii aad qaadato macaashka SSI, waxa suurogal ah in lagu siiyo macaashka bil kasta inta aad shaqeyneyso tan iyo inta dakhligaaga iyo hantidaaadu ku eg tahay cad go'an. Haddii lacagta caddaanka ah lagaa joojiyo waayo dakhliga ku soo gala ayaa ka badan xadka u go'an SSI, weli waxa laga yaabaa in aad xaq u yeelato Medicaid.

Waxaa jira barnaamijyo kale oo kaa caawin kara kharashka xagga waxbarashada, tababarada, iyo ka soo kabashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada dadka naafada ah ee shaqeynaya waxa aad ka heleysaa Xafiiska Lambarka Bulshada.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno

su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka.

Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10068-SO | July 2017
Dib U Eegista Naafanimadaada

What You Need To Know: Reviewing Your Disability (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense

Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha